

Safarrada jirrada (Sjukresor)

Warbixin iyo sharciyo quseeya adigaaga u baahan safar si aad u hesho daryeel caafimaad

Safarka jirrada

Waxad heli kartaa magdhawga qarashka safarkaagii aad u tagtay ama kaga soo noqotay xarumaha daryeelka caafimaadka ee gobolka Kronoberg. Waxay qusaysaa dhammaan daryeelka caafimaad ee ay Landstinget-ku maamusho iyo daryeelka caafimaadka gaarka loo leeyahay ee heshiis la leh landstingetka.

Doorashadaada koowaad waa inay noqoto bas, tareen ama gaarigaaga khaaska ah. Landstinget-ku waxay doonaysaa in aad isticmaasho bas ama tareen sababtoo ah waxay u fiicanyihiin bay'adda.

Marka loo baahdo waxad dalban kartaa gaari adeeg (servicebil) sida gaadiid jaranjar leh ama jiif lagu raaci karo. Qiimuhu waa 100 karoon.

Si aad u hesho magdhawga qarashkii baxay waxad u baahantahay in aad kaydsato rasiidhadaadii daryeelka caafimaadka. Waxa loo baahanyey in laga shaambadeeyo xarunta caafimaadka, doorashada gaadiidkana waxa loo baahanyey in la xarriirgo.

Haddii lagu qoro in aad u baahantahay daryeel caafimaad oo aan ka jirin gobolka, waxad mararka qaarkood heli kartaa lacagta safarka..

Haddii aad qabto su'aalo, wac Serviceresor (adeegga safarrad), tilifoon lambar 0470 194 04.

Haddii aad raacayso bas

Warqadda ballanta tus darawalka baska marka aad dhakhtarka u safrayso, marka aad guriga u saftaysana tus rasiidhka xarunta caafimaadka. Markaa bilaash ayaad ku raacaysaa.

Haddii aanad haysan ballan lagu soo diray, waa in aad adigu tigidhka iibsato oo aad kaydsato. U sheeg darawalka baska inta aanad lacagta bixin in aad rabto tigidh. Sidoo kale kaydso rasiidhada booqashada dhakhtarka, kana codso shaqaalaha caafimaadka inay kuu shaambadeeyaan rasiidhka.

U dir tigidhka iyo rasiidhka xagga Serviceresor (adeegga safarrada). Markaa waxa lagu soo celinayaa lacagtii tigidhka.

Lacagta keli ah ee aanad dib u heli karin waa haddii aad bixisay 20 karoon oo dheeraad ah marka aad tigidhka baska ku bixiso kaash ahaan. Isticmaal kaarka lacagta lagu bixiyo ama kaarka safarka ee gaadiidka gobolka, markaa waxad ka baaqsanaysaa in aad bixiso 20 karoon oo dheeraad ah.

Haddii aad raacayso tareen

Haddii aad raacayso tareen, waa in aad mar walba adigu iibsato tigidhka. Iibso tigidh tareen oo heerka labaad ah.

U dir tigidhka iyo rasiidhka xagga Serviceresor (adeegga safarrada). Markaa waxa lagu soo celinayaa lacagtii tigidhka.

Haddii aad raacayso gaarigaaga gaarka ah

84ta kiilomitir ee ugu horraysa ee gaadhigu socdo, waa in aad adigu iska bixiso. Taasi waxay qusaysaa safark aad ku tegayso xarunta caafimaadka iyo noqoshada ba. Waxa lagu magacaabaa qarashka aad gaarka u bixinayso (egenavgift).

Haddii aad waddo gaariga wax ka dheer 84 kiilomitir , waxa lagu magdhabayaa halkii maylba 12 karoon.

Kaydso rasiidhada daryeelka caafimaadka xiitaa haddii safarku ka gaabanyahay 84 kiiloomitir. Rasiidhada waxa hadhow loogu baahan karaa si aad u heli karto kaarka bilaashka.

Waxad gaari ku raaci kartaa bilaash haddii aad degentahay meel ka fog maxaddada baska, waana in aad gaariga u raacdo ilaa maxaddadda baska, kana raacdo. Laakiin taasi waxay jiraysaa uun haddii safarka basku ka dheer yahay safarka gaariga. Haddii aanad hubin in taasi ku qusayso adiga, wac oo waydii egenavgift (Adeegga safarrada), tilifoon lambar 0470 194 04.

In aad raacdo gaari adeeg ama gaadiid jiifka lagu raacayo

Marka loo baahdo waxad dalban kartaa gaari adeeg sida gaadiid jaranjar leh ama jiif lagu raaci karo. Waa in aad bixiso qarash aad adigu iska bixinayso, 100 karoon. Sii qaado lacagta oo toos ugu bixi gaariga dhexdiisa. Kaydso rasiidhada. Waad u baahantahay haddii aad dalbanayso kaarka bilaashka.

Ka ballanso safarka Serviceresor (Adeegga safarrada), tilifoon lambar 0775 77 77 00. Waa in aad wacdo oo aad ballansato ka har saacadda 15ka maalmaha caadiga ah inta aanad u safrin xarunta daryeelka caafimaadka. Safarka aad guriga ugu noqonayso waxa la ballaminayaa markay dhammaato booqashada caafimaadku.

Baska Linnéan ee ku socda Malmö ama Lund

Maalmaha caadiga ah bas khaas ah oo la yiraahdo Linnéan ayaa u kala baxa Växjö, Lund iyo Malmö. Basku waa mid leh raaxo dheeraad ah, wuxu leeyahay wiish, meel loogu talagalay kursiga curyaanka iyo meel jiifka lagu raaci karo.

Waxad Linnéan ku raaci kartaa bilaash haddii aad haysato warqad shaqaynaysa oo laguugu gudbiyey daryeelka caafimaad ee Malmö ama Lund.

Ka ballansado safarka Serviceresor (Adeegga safarrada), tilifoon lambar 0775 77 77 00. Waa in aad wacdo oo aad ballansato ka har saacadda 15ka maalmaha caadiga ah inta aanad u safrin xarunta daryelka caafimaadka.

Haddii aad safar jirro ku aadayso meel ka baxsan gobolka Kronoberg

Waxad lacag u heli kartaa safarradaada haddii aad daryeel caafimaad ka raadsanayso gobollada kale ee aan ahayn Kronoberg. Haddii aad adigu iskaa u dooratay in aad caafimaad ka raadsato meel ka baxsan gobolka Kronoberg, adigaa iska bixinaya safarka.

Haddii aad qabto su'aalo, wac Serviceresor (adeegga safarrada), tilifoon lambar 0470 194 04.

Dib u helitaanka lacagta

Marka aad ku safarto bas ama tareen waxad soo diraysaa rasiidhadii caafimaadka iyo tigidhadii aad isticmaashay.

Haddii aad ku safartay gaarigaaga gaarka ah, waxa kugu filan in aad soo dirto rasiidhadii xarunta caafimaadka.

U dir:

Serviceresor

Videum

351 96 Växjö

Rasiidhadu ma aha inay ahaadaan qaar ka da'weyn hal sano.

Difaaca qarashka badan

Uma baahanid weligaa in aad safarka jirrada ku bixiso wax ka badan 1800 karoon laba iyo toban bilood gudahood. Marka aad bixiso 1800 karoon waxad heli kartaa kaarka bilaashka.

Waxad adigu kaydsanaysaa rasiidhadaada, una soo diraysaa Serviceresor. Kaarka bilaashku wuxu quseeyaa wakhtiga ka harsan laba iyo tobanka bilood.

Haddii safarkaadu habsaamo

Serviceresor waxay qabaan damaanadqaad safar. Haddii safarkaaga jirradu dib u dhaco, taas oo keenaysa in aad ka habsaanto ciddii ku daweynaysay wax ka badan 20 daqiiqo, markaa waxad ka baaqsanaysaa in aad bixiso qaybtii kuu gaarka ahayd ee qarashka.

Waxad soo dalbanaysaa in lagu magdhabo safarka habsaamay, adiga oo soo buuxbuuxinaya foom. Waxad wacdaa 0775 77 77 00 si aad u dalbato foomamka. Waa in aad soo dirto codsiga 30 maalmood gudahood, safarkaa habsaamay ka dib.

Damaanadqaadka safarku ma jiro haddii habsaanku la xiriiray shil, cimilo aad u xumaatay ama shaqo joojin.

Waxbixin dheeraad ah oo ku saabsan safarka jirrada

Haddii aad qaabto su'aalo ku saabsan safarka jirrada, waxad nagala soo hadli kartaa annaga oo ah Serviceresor telefoonkan 0470 194 04. Waxan ka jawaabaynaa telefoonka isniinta ilaa jimcaha inta u dhaxaysa saacadaha 08.00 iyo 12.00. Haddii aad rabto in aad na soo booqato, adareesku waxa weeye PG Vejdes väg 15 i Växjö.

Waxa kale oo aad nagula soo xiriiri kartaa email ahaan: sjukresor@rfss.se.

Warqad u soo dir Serviceresor, sida tusaale ahaan rasiidhada, waxad u soo diraysaa:

Serviceresor

Videum

351 96 Växjö

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan marka basasku baxayaan, waxad waci kartaa adeegga macaamiisha (Kundcenter) 0771 76 70 76.

Haddii aad dalbanayso safar caafimaad oo la raacago gaari adeeg, waxad wacaysaa lambarkan 0775 77 77 00.

Wax fikrado ah oo ku socda Serviceresor

Ma rabtaa in aad fikrado ku biiriso Serviceresor , wac maalmaha caadiga ah lambarka 0775 77 77 50 saacadaha u dhexeeya 07.00-19.00 , maalmaha fasaxa ahna inta u dhaxaysa 08.00-18.00.

Waxa kale oo aad nagula soo xiriiri kartaa iimayl ahaan: serviceresor@rfss.se.